

OFFICE OF ENGLISH LEARNERS

615 Fessey Park Rd , Nashville, TN 37204
 (615) 259-8608 FAX (615) 214-8655

Nidaamka Diiwaangelinta:


Haddii ilmahaaga ama adiguba aad ku hadashaan luqad aan Ingiriis ahayn, waa in ardayga imtixaan lagaga qaado Xafiiska Ardayda Baranaysa Luqada Ingiriiska (Office of English Learners).

Fadlan wac 615-259-8608 si aad ballan u qabsatid. Waa inaad hasatid maclumaadka soo socda marka aad ballanta qabsanaysid:

- Magaca ardayga oo sadexan, iyo taariikhda dhalashada
- Fasalka ardaygu ku jiro
- Maclumaadka iskuulkii hore ee ilmuuhu dhigan jirey
- Teleefan lambar

Waa inaad hore u soo qaadatid maalinta aad ballanta leedahay waxyaabaha soo socda:

- Warqada dhalashada ardayga, I-94, baasaboor ama fiisaha.
- Warqada tallalka ee TN.
- Warqad caddaynaya in ardaygu caafimaadka jidhka ku maray Maraykanka mudo hal (1) sano ka yar →
- Caddayn deganaasho sida biilkha (Biyaha, Korontada, Teleefanka ama warqada ijaarka oo waalidka magacoodu ku qoran yahay).
- Waalidka/Masuulka midkood waa inuu sito/wato taysare.
- Maclumaad ku saabsan haddii ilmuuhu hore u heli jiray adeegyada Waxbarashada Khaaska ah, haddii ay suurto gal tahay.
- Diiwanada iskuulkii hore, haddii ay suurto gal tahay, gaar ahaan ardayda fasallada 9^{aad} -12^{aad}.



The form is titled "CERTIFICATE OF IMMUNIZATION" and includes sections for "Religious Exemption", "Child Care Exemptions", "Health Examination Documentation required", and "Child has been examined". It also includes sections for "Certified by physician/nurse" (with options for "Dental Screening" or "Vision Screening") and "Required Vaccines for School or Child Care Attendance". The "Required Vaccines" section lists various vaccines with checkboxes for each dose administered. At the bottom, there is a section for "Recommended Vaccines (Documentation Optional)" and a "Printed or Stamped Name, Address, Phone or Quoted Healthcare Provider or Health Department". A "Certified by (Signature/Stamp)" field and a "Date of Issue" field are at the bottom right.

FADLAN ku talagal in aad xafiiska joogaysid 30 daqiiqo ilaa 1 saac iyo 15 daqiiqo (ardaygiiba) si loo dhammaystiro hawla imtixaanka iyo diiwaangelinta. Ogow in wakhti intaa ka badan qaadan karto kiisaska gaarka ah, sidaa daraadeed ku talagal markaad ballanta qabsanaysid. Xafiisku wuu yaryahay, waxaa loo baahanyahay in jabaqda la yareeyo inta imtixaanka lagu guda jiro. Xaddid tirada dadka kuu soo raacaya ballanta.

Waxyaabaha aad filan kartid waqtiga ballantaada:

- Shaqaaluhu waxay iskuulka u sawiri doonnaan wixii sharchiyo ah ee loo baahan yahay.
- Shaqaaluhu waxay kaa caawinayaan buuxinta waraaqaha diiwaan gelinta, waxayna ku weydiin doonnaan su'aalo ku saabsan waxbarashadii hore ee ilmahaaga.
- Ilmahaaga waxaa laga qaadi doonaa imtixaan lagu qiimaynayo aqoonta uu u leeyahay luqada Ingiriiska sida qoraalka, akhriska, hadalka iyo fahamka.
- Haddii loo baahdo, waxaa ilmahaaga loo fidin doonaa Adeegyada Ardayda Baranaysa Ingiriiska (EL).
- Waxaa lagu siin doonnaa maclumaad ku saabsan iskuulka ilmahaagu dhigan doono iyadoo loo eegayo cinwaanka qoyska.

Ballantaada ka dib:

- Haddii ilmahaagu ku jiro fasallada K-8^{aad}, gee waraaqaha iskuulka ilmahaaga si ay fasallada u bilaabaan.
- Haddii ilmahaagu ku jiro Dugsiga Sare, gee waraaqaha iskuulka ilmahaaga si loogu meeleyeo fasal (grade).